



Maternal & Child Health Block Grant

Guudmar
Codsiga 2022 & Warbixinta
2020

AGOOSTO 2021



Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-525-0127. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir civil.rights@doh.wa.gov.

Lambarka Daabacaadda

DOH 141-037 August 2021 Somali

Sidii aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama nuqulo dheeraad ah oo warbixintaan ah:

Division of Prevention and Community Health (Qeybta Ka Hortagga iyo Caafimaadka Bulshada)

Office of Family and Community Health Improvement (Xafiiska Horumarinta Caafimaadka Qoyska iyo Bulshada)

P.O. Box 47855

Olympia, Washington 98504-7855

360-236-4501

800-525-0127

ohc@doh.wa.gov

Umair Shah, MD, MPH
Xoghayaha Caafimaadka

Macluumaad Ku saabsan Maternal and Child Health Services Block Grant (Deeqaha Adeegyada Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka)

Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka) waxay la shaqaysaa hawlgalayaasha gobolka Washington si loo kobciyo caafimaadka haweenka, dhallaanka, carruurta, dhallinyarada, iyo qoysaskooda.

Ilo maaliyadeed oo heer gobol iyo heer federaal ah oo kala duwan ayaa taageera shaqadeena barnaamijka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka. Maternal and Child Health Block Grant (Deeqda Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka) waxay bixisaa taageero maaliyadeed iyo farsamo oo lagama maarmaan ah. Sannad maaliyadeedkii 2020, gobolka Washington wuxuu barnaamijkaan ku helay maalgelin dhan \$8.8 milyan.

Si loo helo deeqdan sanad walba, Office of Family and Community Health Improvement (Xafiiska Horumarinta Caafimaadka Qoyska iyo Bulshada) ee DOH wuxuu codsi iyo warbixino u gudbiyaa U.S. Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha ee Maraykanka), Health Resources and Services Administration (Maamulka Khayraadka iyo Adeegyada Caafimaadka), Maternal and Child Health Bureau (Xafiiska Caafimaadka Hooyada iyo Dhallaanka). Codsiga waxaa ka mid ah:

- xog ku saabsan dhowr tallaabo oo heer qaran iyo gobol ah,
- guudmarka miisaaniyadda, iyo
- warbixin ku saabsan waxqabadyadii hore, kuwa hadda ah, iyo kuwa qorshaysan.

Istaraatiijiyoyinka Hadda Jira ee Loogu Talagalay Lacagaha Deeqaha

Deeqdan sannadkan, DOH waxay tilmaamtay xeelado aan rumaysan nahay inay sida ugu fiican ugu adeegi doonaan mid kasta oo ka mid ah shanta qaybood ee bulshooyinka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ee ka jira gobolkeenna. Si loo ogaado xeeladahaan, DOH:

- waxay qiimeyn ku samaysay baahida bulsho walba,
- waxay tixgelisay awoodda DOH iyo hawlgalayaasheeda badan,
- waxay kala tashatay hawlgalayaasha danhooda iyo waxyaabaha ay mudnaanta siiyaan,
- waxay ururisey ra'yi-celin dadweynaha iyadoo isticmaalaysa qiimaynta baahiyaha ee 2020, iyo
- waxay tixgelisey shuruudaha federaalka iyo qorshayaasha istaraatiijiyadeed iyo waxyaabaha mudnaanta u leh gobolka Washington.

Iyada oo lagu salaynayo falanqayntaan, iyo sida ay u baahan yihiin dadka deeqada bixinaya, DOH waxay dooratay cabbiraadda waxqabadka qaranka oo loogu talagalay wareegga deeq bixintan ee shanta sano ah (Oktoobar 1, 2020-September 30, 2025). Tallaabooyinkani waxaa loogu talagalay inay si wax ku ool ka ah u horumariyaan caafimaadka iyo badqabka bulshada hooyooyinka iyo dhallaanka ah ee Washington. Waxay kala yihiin:

| Cabbirka(Cabbiradda) Waxqabadka Qaranka | Nooca Dadweynaha |
|--|---|
| Booqashada Caafimaad ee Haweenka | Caafimaadka Haweenka/Hooyada |
| Naas-nuujinta | Caafimaadka Dhallaanka/Ilmaha Yar |
| Baaritaanka Koritaanka | Caafimaadka Carruurta |
| Booqashada Caafimaad ee Dhalinyarada | Caafimaadka Dhalinyarada |
| Hoyga Caafimaadka iyo Caymis Ku Filan | Carruurta leh Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Gaarka ah |

Waxaan sidoo kale ku darnaa cabbiraadaha waxqabadka gobolka ee diirada saaraya:

- yareynta niyad-jabka iyo kordhinta helitaanka daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka iyo maskaxda,
- la-taliyayaal dad waaweyn ah oo loogu talagalay dhalinyarada,
- kahortagga isticmaalka khamriga ee dhalinyarada,
- awood u yeelashada iska bixinta kharashaadka iyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka, iyo
- diyaarinta qiimeynta baahiyaha xagga hooyooyinka iyo dhallaanka ah ee xiga.

Diirad Saarista U Sinaanta Caafimaadka

Maadaama barnaamijka deeqda uu diiradda saarayo caawinta dadka dakhligoodu hooseeyo ama helitaankooda adeegyada caafimaad uu xaddidan yahay, wuxuu sidoo kale gacan ka geysanayaa shaqada gobolka ee ah in wax laga qabto arrimaha u-sinnaanta caafimaadka. Tusaale ahaan, wuxuu gacan ka geysanayaa shaqada aan ka qabano xarumaha caafimaadka ee ku yaala dugsiyada. Xarumahani waxay daryeelka caafimaad ka dhigaan mid ay heli karaan dhalinyarta kuwaas oo caqabado ka haysta inay raadsadaan daryeel caafimaad oo joogto ah.

Shaqadeenu waxay diiradda saareysaa arrimaha sinnaanta, dadka aan haysan adeegyo ku filan, iyo meesha ay baahi ka jirto. Waxaan taageernaa xalalka ay bulshadu hogaanka ka tahay, waxaana diiradda saarnaa wanaajinta nidaamyada kuwaas oo xiriir toos ah la leh kala duwanaanshaha. Shaqadeenu waxay si gaar ah xoogga u saartaa wanaajinta natiijooyinka dhalimada ee Dadka Madowga ah iyo Afrikaanka Ameerikaanka ah iyo Hindida Ameerikaanka/Dadka Dhaladka ee Alaska.

Waxaan sidoo kale raadinaa inaan ogaano meelaha baahida loo qabo adeegyadu ay ka badan tahay sahayda la heli karo. Waxaana ka mid ah adeegyada dhalimada kahor ah ee laga helo miyiga. Waxaan heshiisyo la galnaa adeeg-bixiyeyaasha si aan si wanaagsan ugu adeegno gobolladaas.

Dhammaan shaqadani waxay noo dhoweynaysaa ku guuleysiga hadafka DOH ee ah sinnaanta iyo caafimaadka haboon ee loogu talagalay qof walba.

Baro Wax Badan Oo Ku Saabsan Codsiga Hadda ah ee Deeqda

- Si aad wax badan uga ogaato, lasoo deg dokuumentiga oo dhamaystiran: [Washington State Maternal and Child Health Block Grant Federal Fiscal Year 2022 Application and Federal Fiscal Year 2020 Annual Report](#) (PDF, 414 bog, Ingiriis kaliya ah).
- Haddii aad qabto su'aalo ama aad jeclaan lahayd inaad faallo nala wadaagto, fadlan la xiriir OHC@doh.wa.gov ama wac 360-236-4501 (gudaha ah) ama 800-525-0127 (bilaash ah).